

HA LA DIWAAN GAL'YO

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Muqdisho, 09/08/ 2015 10/8/15

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka F. Soomaaliya Muqdisho

Ujeedo: **Soo Jeedin(Motion) u Yeerid Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda F.Som.**

Mudane Guddoomiye,
Annagoo ah Xildhibaanada ay Magacyadooda hoos ku saxiixan yihiin, kana tirsan xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaan halkan kuugu soo gudbinaynaa soo jeedinteenna (Motion)ku saabsan u yeerid Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, si uu u horyimaado, uga jawaabo su'aalo ku saabsan Qaraarkii Baarlamaanka ee 06/06/2015, kuna saabsanaa diidmada Golaha Baarlamaanka sharci darrada ah ee uu Maamulka KMG Jubba kaga dhawaaqay Kismaayo 15/04/2015.

U yeeritaanka R/Wasaaraha, waxaa loo cuskaday:-

- Qod. 63aad Faq. 2aad Xarfaha B iyo C ee Dastuurka J.Federaalka Soomaaliya ee tilmaamaya awoodda Golaha Baarlamaanka ee la xisaabtanka hay'adaha dowladda iyo u yeeridda iyo la xisaabtanka R/Wasaaraha iyo xubnaha Golaha Wasiirrada;
- Qod. 49aad Xeer-hoosaadka Golaha ee tilmaamaya habka soo jeedinta
- Qaraarka Baarlamaanka F.Soomaaliya Ir GSH/20/2015 ee 06/06/2015

Sidaa darted, waxaan Guddoonka Baarlamaanka si xushmad leh uga codsanaynaa in R/Wasaaraha sida ugu dhaqsaha badan loogu yeero si uu uga jawaabo, su'aalaha ku saabsan xadgudubyada sharciyeed ee uu ku kacay.

Xildhibaanada saxiixay soo jeedinta:

1. Xildhibaanada saxiixay soo jeedinta:
Xildhibaanada saxiixay soo jeedinta:



